



Jamhuuriyadda Somaliland

Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda

Xeer Nidaamiyaha Lambarrada Adeegyadda Isgaadhsiinta

Lr. 02/2021



ARAAR

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL

- Markaan Arkay:** Qodobka 3aad, faqraddisaa 12aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2020;
- Markaan Arkay:** Kobaca iyo hormarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta casriga ah oo ay hormood u yihiin Shirkaddaha Isgaadhsiinta dalku;
- Markaan Arkay:** Waajibaadka wasaaraddu qaranka u hayso masuulkana uga tahay oo ah mid ballaadhan una baahan in loo fuliyo si haboon;
- Markaan Tixgaliyay:** Muhiimadda ay leedahay bixinta, hubinta iyo kor-joogtaynta lambarrada adeegyada Isgaadhsiinta.
- Sidaa Daraaddeed;** Waxaan halkan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Lambarrada Adeegyada Isgaadhsiinta, Xeer Lr. 02/2021 oo ka kooban qodobadan soo socda;

Tusmo

CUTUBKA 1AAD:

QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad	Magaca Xeer-Nidaamiyahan	4
Qodobka 2aad	Erey Bixin	4
Qodobka 3aad	Xadka Dabaqaadda Xeer- Nidaamiyaha	6
Qodobka 4aad	Ujeedooyinka Xeer-Nidaamiyaha	6

CUTUBKA 2AAD

SHAQADA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

Qodobka 5aad	Awoodda Wasaaradda:	7
Qodobka 6aad	Maamulka Qorshaynta Lambarrada	7
	Isgaadhsiinta Qaranka	

CUTUBKA 3AAD

LAMBARRADAISGAADHSIINTA

Qodobka 7aad	Nidaamka Astaynta Lambarrada Isgaadhsiinta	8
Qodobka 8aad	Cashuuraha & Hubinta Lambarrada	8
Qodobka 9aad	Isgaadhsiinta	9
	Wajjibaadka Loo Asteeyaha Lambarrada	

Qodobka 10aad	Wax-ka-beddelka Lambarrada Isgaadhsiinta	10
Qodobka 11aad	Hakinta Adeegsiga Lambarrada	10
Qodobka 12aad	U Hoggaansanaanta, Xadgudubka iyo Ciqaabta	10
Qodobka 13aad	Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-nidaamiyahan	11
Qodobka 14aad	Dhaqangalka Xeer-ndaamiyahan:	11

CUTUBKA 1AAD

QODOBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeedhayaa “Xeer-nidaamiyaha Lambarrada Adeeggayada Isgaadhsiinta” Xeer-nidaamiye **Lr. 02/2021**.

Qodobka 2aad

Erey Bixin

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

- 1) **Xeer :** Waxa loola jeedaa Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2020
- 2) **Ruqsadle:** Waxa loo la jeeda shirkad la siiyay ogolaansho ay ku bixin karto adeeg isgaadhsiineed si waafaqsan Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland
- 3) **Isgaadhsiinta Elektirooniga ah:** Waxa loo la jeedaa Isgaadhsiinta raadyaha ee qaada cod, qoraal, maqal iyo muuqaal iyadoo lagu hagayo awoodda Elektiroo-magnatiga ah.
- 4) **Lambarka Isgaadhsiinta Elektirooniga ah:** waxa loola jeedaa Lambar, astaan, ama calaamad kasta ah oo ruqsadlaha isgaadhsiintu u adeegsado aqoonsiga adeegga electiroonigga ah ee lalinta iyo qabashada.
- 5) **Wasaarad:** waxa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda
- 6) **Qorshaha Lambarrada Qaranka:** waxa loola jeedaa, shaxda lagu qeexay xeernidaamiyahan ama xeerar kale oo lagu xaqiijinayo habsami u adeegsiga lambarrada isgaadhsiinta Qaranka.
- 7) **Lambar Gaaban:** Waxa loola jeedaa Lambar ka kooban 3 ilaa 6 god islamarkaana loo adeegsado bixinta adeeg isgaadhsiineed oo gaar ah.
- 8) **Lambar USSD :** waxa loola jeedaa lambar u taagan dirista qoraalka u dhexeeya talefoonnada gacanta (iyadoo la adeegsanayo lambar leh calaamad (*), (#)) iyo barnaamijka codsiga shabakadda si wafaafaqsan Nidaamka caalamiga ah ee GSM-ka.

- 9) **Lambarrada la adeegsado:** waxaa loola jeedaa lambarrada loo qoondeeyay macaamiisha iyo ruqsadlaha ee ku jira kaadhka SIM -ka.
- 10) **Adeegyada dheeraadka ah:** Waxa loo la jeedaa adeeg kasta oo ay bixiyaan ruqsadleyaashu marka laga reebo adeegyada Isgaadhsiinta aasaasiga ah.
- 11) **Lambarka gaaban ee adeegyada dheeraadka ah:** Waxa loolaa jeedaa astaan tiro oo loogu talo galay bixinta adeegyo dheeraad ah ay bixiyaan ruqsadleyaashu marka laga reebo adeegyada Isgaadhsiinta aasaasiga.

Qodobka 3aad

Xadka Dabbaqaadda Xeer-nidaamiyaha

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan Ruqsadleyaasha Isgaadhsiinta iyo adeeg -bixiye kasta oo xadhiidh la leh lambarrada isgaadhsiinta.

Qodobka 4aad

Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan

Ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan waxa ka mid ah:

- 1) Kobcinta iyo kor u qaadidda adeegyada isgaadhsiinta dalka.
- 2) Sugidda in Lambarrada isgaadhsiintu ay tahay hanti qaran oo cid gaar ahi lahayn.
- 3) Kor u qaadidda habsami u adeegsiga lambarrada Isgaadhsiinta dalka.
- 4) Samaynta nidaam hufan oo lagu maamulo adeegisga lambarrada isgaadhsiinta.
- 5) Qoondaynta lambarrada si hufan, daahfuran, loo siman yahay iyo muddo kooban iyada oo aan si gaar ah loo takoorayn macmiil, qaybaha kala duwan ee ruqsadleyaasha Isgaadhsiinta.

CUTUBKA 2AAD

SHAQADA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

Qodobka 5aad

Awoodda Wasaaradda:

Shaqada Wasaaraddu waa:

- 1) Astaynta lambarrada adeegyada isgaadhsiinta iyo ganacsiga.
- 2) Maamulidda iyo kormeeridda adeegsiga lambarrada Isgaadhsiinta si loo xaqiijiyo adeegsi ku dhisan cadaalad iyo hufnaan.
- 3) Dhaqangelinta iyo tallaabo ka qaaddista adeegsiga sharci darrada ah ee lambarrada isgaadhsiinta.
- 4) Soo saaridda jadwalka qondaynta adeegsiga lambarada isgaadhsiinta iyo la socodkooda.

Qodobka 6aad

Maamulka Qorshaynta Lambarada Isgaadhsiinta Qaranka

- 1) Qorshaynta lambarrada isgaadhsiintu waxa ay ka kooban yihiin qaybahan hoos ku xusan:
 - a) Shebekadaha Isgaadhsiinta iyo shirkadaha xidhiidhiya wicitaannada dibadda ee kala duwan.
 - b) Adeegyada shabakadaha Telefoonnada Gacanta.
 - c) Qalabka lalinta ee signaling-ka ah
 - d) Adeegyada gurmada degdegga ah, gargaarka, bixinta xogta iyo caafimaadka
 - e) Adeegyada Isgaadhsiinta xogta (data) ee qalabka lalinta.
 - f) Adeegyada Lambarrada gaagaaban ee USSD-ga ah
 - g) Adeegyada dheeraadka ah (VAS),
 - h) Laamaha dawladda sida amniga iyo dabdamiska.
 - i) Lambarrada gaagaaban ee ganacsiga loo adeegsado,
- 2) Wasaaraddu waxa ay ilaalinaysaa isla markaana cusboonaysiinaysaa qorshaha lambarrada isgaadhsiinta sida ugu habboon.

CUTUBKA 3AAD

LAMBARRADA ISGAADHSIINTA

Qodobka 7aad

Nidaamka Astaynta Lambarrada Isgaadhsiinta

- 1- Marka la astaynayo lambar isgaadhsiineed waxa la siin karaa:
 - a) Ruqsadle bixiya adeeg isgaadhsiineed.
 - b) Cid kasta oo bixisa adeegyada ku shaqeeya lambarrada adeegayada dheeraadka ah (VAS).
- 2) Cidda kasta oo codsanaysa Lambarrada adeegga Isgaadhsiinta waa in uu u soo gudbiyaa Wasaaradda:
 - a) Codsiga Lambarrada
 - b) Dhammaan waraaqaha looga baahan yahay
 - c) Caddaynta sababaha adeegsiga lambarrada la codsanayo.
 - d) Codsiga tirada lambarrada uu u baahan yahay.
 - e) Qorshaha adeegsiga lambarrada.
- 3) Iyada oo la tixgelinayo Qodobka 2aad, Wasaaraddu waxa ay Astaynaysaa codsadhaha lambarrada Isgaadhsiinta iyada oo siinayasa Shahaadadda astaynta isla markaana bixinaya khidmadda lamabarrada la qoondeeyey.
- 4) Muddo **shan iyo toban maalmood** gudahood ah waa in ay Wasaaraddu kaga jawaabto codsiga laga bilaabo maalinta codsiga la qabtay.

Qodobka 8aad

Cashuuraha & Hubinta Lambarrada Isgaadhsiinta:

- a) Cid kasta oo loo asteeyey lambarro waa in uu u soo gudbiyaa Wasaaradda warbixinta lambarrada iyo rasiidhaha cashuurta sannad kasta dhammaadkiisa.
- b) Loo asteeyuhu waa in uu bixiyaa cashuurta lambarrada ee sannadlaha ah.

- c) Cid kasta oo loo asteeyey adeegsiga lambarrada haddii uu ku isticmaali waayo muddo Lix bilood ah ama uu bixin waayo cashuurta sannadlaha Wasaaraddu waa ay kala laaban doontaa qoondaynta.
- d) Haddii codsaduho mar labaad u baahdo adeegsiga lambarrada waxa uu soo qoran doonaa codsi cusub isagoo buuxinaya shuruudaha looga baahan yahay.

Qodobka 9aad

Wajjibaadka Loo Asteeyaha Lambarrada

- 1- Loo Asteeyuhu waa in uu u adeegsado lamabrrada ay Wasaaraddu u astaysay si waafaqsan qorsha Lamabrrada Qaranka isaga oo xaqiijinaya in hantidaasi:
 - a) U adeegsaday si waafaqsan qoondada (qondaynta).
 - b) Ku kooban adeegga Isgaahdhsiinta loo asteeyey.
 - c) U adeegsaday hab lagu aqoonsado adeegga Isgaadhsiinta ee uu bixinayo.
 - d) U adeegsaday si waafaqsan Tilmaamaha Codsiga iyo Khidmadaha Khayraadka Lambarrada ee ay Wasaaraddu u astaysay.
- 2- Dhammaan Ruqsadleyaasha Isgaadhsiintu waa in ay u asteeyaan lambarro isku mid ah adeegyada hoos ku qoran:
 - a) Gurmadka Degdegga ah
 - b) Adeegyada Caafimaadka
 - c) Amniga
 - d) Dabdemiska
 - e) Bixinta Xogta
- 3- Cashuuraha Sananadlaha ah ee lambarrada waa in lagu bixiyaa Wasaaradda.
- 4- Loo asteeyuhu dib uma iibin karo, kumana wareejin karo cid saddexaad lambarrada Isgaadhsiinta ee hore loogu asteeyay.
- 5- Loo asteeyuhu isaga ayaa ka masuul ah joojinta dhaqdhaqaaqa lambarrada adeegyadooda la hakiyey.
- 6- Loo asteeyuhu haddii uu ka maarmo lambarradii loo asteeyey waxa uu Wasaaradda ku wargelinayaa muddo sagaashan Cisho ah inta aanay dhicin Shahaadada Lamabradu.

Qodobka 10aad**Wax-ka-beddelka Lambarrada Isgaadhsiinta**

Haddii ay lagama maarmaan noqo dib -u -eegista lambarrada, Wasaaraddu waxay ogeysiis siin doontaa Loo-asteeyaha ugu yaraan lix (6) bilood ka hor taariikhda dib u eegista.

Qodobka 11aad**Hakinta Adeegsiga Lambarrada**

- 1) Wasaaraddu waxay hakin kartaa Astaynta lambarrada haddii loo asteeyuhu:
 - a. Ku guul -darraysto inuu adeegsado lambarrada isgaadhsiinta ee loo asteeyey.
 - b. Ku guuldareysto inuu bixiyo cashuurta sanadlaha ah.
 - c. Uu u adeegsado si sharci darro ah.

CUTUBKA 4AAD:**QODOBBO GUUD****Qodobka 12aad****U Hoggaansanaanta, Xadgudubka iyo Cigaabta**

1. Cidna ma adeegsan karto lambar isgaadhsiineed shahaadada astaynta la'aanteed.
2. Ruqsadle kasta oo bixiya adeegga Isgaadhsiinta uma adeegsan karo astaanta gaaban ee wicidda tooska ah, SMS -ka, ama Xogta Adeegga Dheeraadka ah (USSD) iyada oo aanu oggolaansho ka haysan Wasaaradda.
3. Ruqsadlaha isgaadhsiintu ma adeegsan karo lambarro, mana sii wadi karo bixinta adeeg Isgaadhsiinta haaddii aan loo cusbooneysiin shahaadadda sanadlaha ah.
4. Cidna dib uma iibin karo ama kama ganacsan karto nooc kasta oo lambarada isgaadhsiinta ogolaanshiyo la'aan.
5. Haddii Loo asteeyuha hakiyo lambarrada, ka dibna lagu helo inuu u adeegsanayo shabakaddiisa waxaa loo qaadan doonaa inuu jebiyey sharciga astaynta.

6. Cidda kasta oo ku guul darraysta ku dhaqanka qodobada xeer -nidaamiyahan waxa loo aqoonsan doonaa in uu baalmaray sharciga, waxaana uu mutaysan doonaa ganaaxyada ku xusan shaxda tacriifadda wasaaradda.

Qodobka 13aad

Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax-ka-beddel iyo kaabis marka loo baahdo.

Qodobka 14aad

Dhaqangalka Xeer-ndaamiyahan:

Xeer- nidaamiyahan waxa uu si rasmi ah u dhaqan geleyaa isla maalinta uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknooloojiyadda laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

12/02/2022

Dr. CabdiWeli Sh. Cabdillahi Suufi Jibriil

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknoolajiyadda.



Jamhuuriyadda Somaliland

Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo
Tiknoolajiyadda

www.mict.sldgov.org